# DHAMBAALKA AGA

HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO & HAL-ABUURKIISA

WAA DHAMBAAL AFAR-BILOODLE AH OO KU HADLA CODKA AKADEMIYA GOBOLEEDKA AF SOOMAALIGA

TIRSIGA 26AAD, SANNADKA 9AAD, MAAJO–AGOOSTO 2026


## Safiirka Jabuuti ee Soomaaliya oo soo Booqday Xarunta Akademiya Goboleedka AGA 2aad




Hambalyada Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya ee 13guurada Aasaaska AGA 6aad

Tababbar ah "Habdhigaalka Af Soomaaliga" oo loo Qabtay Madbacadaha 8aad

Xoojinta Iskaashiga AGA iyo Jaamacadda Ummadda 7aad

Diyaarinta Ereybixinta Af Soomaaliga ee Amniga Saybarka 7aad

Bandhig Sawir-gacmeedyo lagu Qabtay London 9aad

Xuska Sannadguurada 13aad ee Aasaaska AGA 6aad


**Akhris-Qoraalku Waa Furaha Aqoonta iyo Horumarka Qofka iyo Bulshada**

# TUSMADA TIRSIGAN


1. **Safiirka Jabuuto ee Soomaaliya**......................2
2. **EREYGA TIFAFTIRKA**..............................3
3. **QORMOOYIN HORTABIN MUDAN**............4
4. **WARARKA WAXQABADKA AGA**...............6
5.Hambalyada Wasiirka ..................................................6
6. Xuska sanadguurada AGA.......................................6
7. Xoojinta Iskaashiga AGA iyo Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed..........................................7
8. Diyaarinta Ereybixinta Af Soomaaliga ee Amniga Saybarka...................................................7
9. Aqoonkororsi ku Saabsan Miisaanka Maandada....................................................7
10. Tababbar ah "Habdhigaalka Af Soomaaliga" oo loo Qabtay Madbacadaha...........................................................7
11. Kulanaqooneed AGA ku Qabatay Magaalada Kismaayo...........................................7
**5. WARAR KALE OO XUSID MUDAN**.............8
12. Gorfaynta Buugga "Habdhigaalka Af Soomaaliga Guud**..................................................8**
13. Munaasabad lagu Maamuusay Qoraa Cali Muuse Ciye oo lagu Qabtay Minnesota.......................8
14. Furitaanka Hoyga Dhaqanka Soomaalida london...........................................................8
15. Munaasabadda Sannadka Dabshidka Soomaalida oo Muqdisho lagu Qabtay.........................................................8
**6. SUUGAANTA & HAL-ABUURKA**....................14



**GOOSANKA TIFAFTIRKA**

**Tifaftiraha Sare**
Mustafa C.Fayruus

**Agaasimaha**
Axmed M.Dhicisow

**Madaxa Farsamada**
Maxamed Muxiyadin (Ing. Carab)

**Kaaliyaha Tifaftiraha**
Cabdulqaadir Diini

**Xoghayaha Titaftirka**
Saynab Xaaji Axmed (ugbaad)

**Bahda Tifaftirka**
Cabdullaahi Shiikhaaloow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Dayax Axmed-Iley.



**Kala xirii : info@aga.so**
**Facebook: @aga.afsoomaali**
**Twitter:@somaliacademy**
**Website:www.aga.so**


## Safiirka Jabuuti ee Soomaaliya oo soo Booqday Xarunta Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga AGA



Danjiraha Jamhuuriyadda Jabuuti u fadhiya Soomaaliya, Md. Cismaan Dubbad Sugulle, ayaa 16/8/2026 booqasho ku yimid xarunta Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), iyadoo ujeeddada booqashadu ahayd dhiirrigelin, indha-indhayn iyo xoojinta wada-shaqaynta dalalka ku midooway AGA.

Guddoomiyaha AGA, Macallin Saciid Saalax Axmed, ayaa ku soo dhaweeyay xarunta, isagoo Danjiraha uga warbixiyay hawlaha socda, caqabadaha jira iyo baahiyaha taagan.

Danjiraha ayaa intii uu booqashada ku jiray kormeer ku sameeyay qaybaha kala duwan ee xarunta, isagoo u kuurgalay hawlaha ay Akademiyadu waddo.

Sidoo kale, Danjiraha ayaa Guddoomiyaha AGA u gudbiyay salaan uu uga siday Madaxweynaha Jabuuti, Md. Ismaaciil Cumar Geelle. Labada dhinac ayaa ka wada hadlay sidii Safaaradda Jabuuti uga qayb qaadan lahayd taageeridda iyo horumarinta hawlaha AGA, iyagoo ku ballamay xoojinta iskaashiga labada dhinac.

Guddoomiyaha AGA, Macallin Saciid Saalax Axmed, ayaa ugu danbayntii dawladda Jabuuti uga mahadceliyay kaalinta hormuudnimo ee ay ka qaadato hawlaha Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga AGA tan iyo aasaaskeedii ilaa maanta.

U hiilli afkaaga hooyo

# EREYGA TIFAFTIRKA

## Akhris-Qoraalku Waa Furaha Aqoonta iyo Horumarka Qofka iyo Bulshada

Bulsho leh akhris-qoraal heer sare ahi, waxay leedahay awood ay ku horumariso waxbarashada, dhaqaalaha, caafimaadka iyo mustaqbalka jiilasha soo socda. Akhriska iyo qoraalku waxay qofka u furaan albaabka aqoonta, waxayna kobciyaan fikirka, hal-abuurka iyo fahamka nolosha.

Inkasta oo akhris-qoraalku leeyahay muhiimaddaa weyn, haddana waxaa jira caqabado hor taagan horumarkiisa. Carruur badan oo ku nool miyiga, deegaannada saboolka ah ama meelaha ay colaaduhu saameeyeen, ma helaan fursado waxbarasho oo ku filan. Qoysas badan ayaa, sidoo kale, la tacaalaya duruufo dhaqaale oo ka hor istaaga inay daboolaan kharashaadka waxbarashada ubadkooda.

Caqabad kale oo jirta waa tabardarrida dhaqanka akhriska. Dad badan ayaa akhriska u arka wax ku kooban sannadaha iskuulka, halkii ay ka dhigan lahaayeen caado joogto ah.

Si loo xoojiyo dhaqanka akhriska, waxaa muhiim ah in la abuuro maktabado badan, la helo buugaag tayo leh, laguna dhiirrigeliyo carruurta iyo dadka waaweynba inay akhriyaan. Sidoo kale, waxaa loo baahan yahay in la kordhiyo soo saarista buugaag la akhristo, gaar ahaan kuwa carruurta, sayniska, taariikhda, caafimaadka, tiknoolajiyadda iyo suugaanta. Marka qofku helo qoraallo tayo leh oo ku qoran afkiisa hooyo, waxaa u fududaanaysa inuu fahmo, jeclaado oo sii wado dhaqanka akhriska.

Tiknoolajiyaddu waxay leedahay laba dhinac: dhinac waxay fududeysay helitaanka xogta iyo aqoonta, iyadoo dadka u sahashay helidda ilo waxbarasho badan; dhinaca kale, isticmaalka xad-dhaafka ah ee baraha bulshada iyo nuxurkooda gaaban, wuxuu yareyn karaa xiisaha akhriska qotada dheer. Sidaas awgeed, tiknoolajiyadda waa in loo adeegsadaa sidii aalad waxbarasheed taageerta akhriska, iyadoo la horumarinayo buugaag dijitaal ah iyo qoraallo tayo leh.

Horumarinta akhris-qoraalku ma aha masuuliyad ku kooban iskuullada oo keliya. Waalidiinta, macallimiinta, qorayaasha, warbaahinta, dawladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay dhammaantood waxay leeyihiin kaalin mug leh oo looga fadhiyo inay ka soo dhalaalaan.

Ilmaha ku barbaara guri laga qiimeeyo buugga, akhriska iyo waxbarashada, waxaa laga fili karaa inuu dhaxlo jacaylka aqoonta iyo barashada joogtada ah.

Akhris-qoraalku maanta wuxuu ka dhigan yahay awoodda qofku uu ku fahmo xogta, ku kala saaro xaqiiqada iyo marin-habaabinta, kuna isticmaalo aqoonta si masuuliyad leh. Waa furaha qofka u sahla inuu fahmo xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa, waana fursad uu noloshiisa ku hormarin karo.

Ahmiyaddaas awgeed, hay'adda UNESCO, (Hay'adda Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka ee Qaramada Midoobay), waxay 8da Sebtembar sannad kasta u astaysay Maalinta Caalamiga ah ee Akhris-qoraalka. Maalintan waxaa loo asteeyay in lagu muujiyo doorka akhris-qoraalku ku leeyahay horumarinta dadka iyo dalka, isla markaana lagu xoojiyo dadaallada lagu ballaarinayo helitaanka waxbarashada.

Akadeemiya Goboleedka Af Soomaaligu, iyadoo tixgelinaysa muhiimadda arrintan, waxay qorshaysay qabashada kulammo iyo aqoonwadaagyo lagu maamuusayo munaasabaddan, laguna muujinayo ahmiyadda akhris-qoraalka; lagu falanqaynayo heerka iyo xaaladda uu akhris-qoraalku ka yahay bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda, isla markaana wax la iska weydiinayo tallaabooyinka lagu sii horumarin karo. Waxayna Akademiyadu si toos ah u fulisaa barnaamijyo iyo Akhrsqoraal.

Sidaas darteed, haddii bulshada Soomaaliyeed ay maskax iyo maalba u hurto waxbarashada, dhiirrigeliso akhriska, kordhiso helitaanka buugaagta iyo qoraallada tayada leh; isla markaana xoojiso wadashaqaynta dhammaan qaybaha bulshada, waxaa suurtagal ah in la dhiso jiil aqoon leh, awoodna u leh inuu ilaashado taariikhdiisa, horumariyo dalkiisa, una diyaargaroobo dhisidda mustaqbal wanaagsan.

**Ballanteennu waa kobcinta akhris-qoraalka!**

## QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

# Afmaldaha Ekeeyaha (Qaybta 2aad)

Sidaan qaybtii hore ku soo aragnay, afmaldaha ekeeyuhu waa mid ka mid ah farsamooyinka muhiimka ah ee maansada lagu qurxiyo. Wuxuu abwaanku adeegsadaa si uu wax u sawiro, u xoojiyo macnaha hadalka, una taabto dareenka dhageystayaasha. Ekayntu suugaanta ay sida si gaarka ah ka dhex muuqato waxaa ka mid ah maansooyinka guubaabada iyo kuwa ammaanta; waxaana lagu cabbiraa xaalado kala duwan sida dhiirrigelin, murugo, jacayl iyo bogaadin.

Qoraalkan waxa uu diiradda saaraya sida ekaynta loogu adeegsado maansada guubaabada iyo ammaanta haweenka, iyo doorka ay ku leedahay qurxinta iyo qotodheereynta fariinta suugaaneed.

**Ekaynta Maansada Guubaabada**

Guubaabadu waa hogtixeed ka mid ah hilimada laga maanseeyo,dhacdooyin kala duwanna diiradda lagu saaro: miyi iyo magaalo. Guubaabada tixdu afmaldahyada ay adeegsato, ekeynta ayaa ka dhex muuqata. Farshaxannimadeeda ka sokow, waxaan looga maarmin kicinta dareenka caadifadeed ee hadba cidda lagu caraadinaayo, iyo lafalgalka maankooda.

Aan tusaale u soo qaadano qayb ka mid ah gabay uu Abwaan Cali Xuseen Xirsi Soomaalida ku guubaabinayay. Wuxuu yiri:

Sidii oday gablamayaan wuxuu
dhalay gargaaraynnin
Oo fiid garkiyo labada low
meel isugu geeyey
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye.
**
Sida gaari kii qabay dhintoo
galab la sii qaaday
Oo gorodda loo geliyay mid aan
gabadhu doonaynin
Oo geeridiisii ilmada
gabax ka siinaysa
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye!
**
Sidii geel harraadoo mudkii
geri ka dhuubnaadey
Oo goray ninkii maali jiray
godol ka soo waayay
Oo golangol waa lagu hubaye
gabanta diidaaya
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye!
**
Sida aar gamuun lagu dhuftoo
gubayso waabaydu
Aan geesta ka arkayn wixii
nabarka gaarsiiyey
Oo meel gawaanna u baxoo
miciyihii giijay
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye!
**
Sida geed nimaan garab lahayn
lagu gureynaayo
Oo waxaan gartiisa ahayn
guudka laga saarey
Oo ciil la goodaadsadoo
goroddu laallaado
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye!
**
Sidii doonni maal lagu guroo
guradda loo buuxshay
Oo ay shukaantii geb tiri
gobolna naafoobey
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye!

Haddaan is yara dul taagno tuducyada hore, gabyaagu wuxuu isku barbardhigay ekayntiisa: ''Libaax hooto lala helay oo neef-qaadaya rafashada jibaadkiisa ku maseeyey gocoshada reenkiisa''. Dul ahaan, haddaan u macnaynno wuxuu noqonayaa: ''Soomaaliyeey, hurdadii xalay waxaan ka gam'i waayey daranyaduu gumeysigu idin baday, oo aydan ka diirayn gocashadeeda. Gadgadoon mooyee, il iyo baar isma saarin. Sidaan hadba gabay u tirinaayey, marna dhulka u jugaynaayey, ayuu waagu iigu baryey.''

**Ekaynta Ammaanta Haweenka**

Maansada ammaanta haweenka, gaar ahaan heesaha jacaylka, ayaa aad u adeegsada ekaynta. Tilmaamidda quruxda gabadha, badanaa, waxyaabaha lagu sifeeyaa ekaynteeda waxaa ka mid ah: barwaaqada, hoorrimaadka cirka, roobabka, xareedda, togagga rogmanaya; dhulka doogsaday, magoolka dhirta, manka iyo ubaxa fiiday, hoobaanta bislaatay, cawska tigaaday, cosobka

iyo ugbaadka; geela, fardaha, cadceedda, dayaxa, xiddagaha ikk.

Aan tusaale u soo qaadanno tuducyo ka mid ah heesta (Sida Geed Caleen loo), ee uu curiyay Axmed Saleebaan Bidde. Wuxuu yiri:

Sida geed caleenloo
Ubax guudka qariyeen
Ooy gooni laamaha
Middiba geesteeda
Hoobaan is gaadhiyo
Guntin midhaa leedahay
Oo soo gandoodoo
Galka faraqa soo daray
Oo godan bawaaqa ah
Durduraan gureyniyo
Gacan webi yaalloo
Oon gu'iyo jiilaal
Midab guurin baadtahoo
**
Gabadhyahay kalgacal baad
goortaan ku eegaba
qalbigayga gelisaa
waxse aanan garanayn
ii gunuday caashaqe
halka aad i gaadhsiin!
**
Sidaad tahay gamaan faras
senge geesi daaqsaday
oo uu Galduur miray
sodon bil iyo gawdeed
uu goobay farowgii
sararta iyo gaadada
oo galangalcooboo
cududuhu gamuurmeen
oo galaba loo raro
sida ramad guyaal dhalay
hadba kaynta geeda leh
oon guluf colaad iyo
weli socoto dheer gelin
**
Gabadhyahay kalgacal baad
goortaan ku eegaba
qalbigayga gelisaa
waxse aanan garanayn
ii gunuday caashaqe
halka aad i gaadhsiin!
**
Sida gubanka qaarkii
dhul gargoorku siman yahay
ama maadh galdhiidhoo
gubatiyo ku taal hawd
oo laba gardhooboo
badhba gees u seexdeen
Oo dharabka iyo geedaha
quruxdooda gaarka ah
ama haro gingimanoo
guudka ka xarfanaysoo
shimbiruhu ka giigeen
oon gu' iyo jiilaal
midab guurin baad too!
**
Gabadhyahay kalgacal baad
goortaan ku eegaba
qalbigayga gelisaa
waxse aanan garanayn
ii gunuday caashaqe
halka aad i gaadhsiin!

Tusaale kale aan u qaadanno tuducyo ka mid ah heesta (Shankaroon) ee uu curiyay Cali Diiriye (Cali Gaab), wuxuu abwaanku yiri:

Shaxda geenya joogtoo
Kayn biya shubeeniyo
Ku shakaallan dooxo
Weli aan shirraba gelin
**
Oo shillowga qoortiyo
Shakaal qabadka feeraha
Midab shaadir madow iyo
Shaash lagu hareeyeey
**
Ama shaaca dunidiyo
Cadceedoo shin joogtaad.
Sharafteedii leedee!

Gebagabadii, ekayntu waa tiir muhiim ah oo ka mid ah farsamooyinka afmaldaha suugaanta Soomaalida. Waxay abwaanka ka caawisaa inuu fikradaha iyo dareennada u gudbiyo qaab muuqaal leh oo saamayn ku yeesha akhristaha ama dhageystaha. Sida laga arkayo tusaalooyinka kore ee maansooyinka guubaabada iyo heesaha ammaanta, ekayntu waxay kordhisaa quruxda hadalka, waxayna siisaa maansada dhumuc iyo macne dheeraad ah. Sidaas darteed, adeegsiga ekayntu waa qayb lama huraan u ah farshaxanka falkinta suugaanta iyo gudbinta dareenka, loogamana maarmo dhumuc-cuslaynta xogtebintooda.

Dhammaad

***Qalinkii***
***Macallin Cabdullaahi Sh. Cabdi (Gacanka)***

# WARARKA WAXQABADKA AGA

## Xuska Sannadguurada 13aad ee Aasaaska AGA

Madasha AGA ee bisha Juun, oo 20/6/2026 lagu qabtay aaladda Zoom, ayaa lagu maamuusay sannadguuradii 13aad ee aasaaska Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), laguna falanqeeyay xaaladda af Soomaaliga iyo dadaallada lagu horumarinayo.

Guddoomiyaha AGA, Macallin Saciid Saalax, ayaa soo dhaweeyay Wasiirka Waxbarashada JFS, Md. Faarax Sh. Cabdulqaadir, oo furay madasha. Sidoo kale, waxaa ka hadlay masuuliyiin ay ka mid ahaayeen Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustafa Yaasiin, iyo Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta, Md. Ismaaciil Yuusuf. Masuuliyiintu waxay AGA ugu hambalyeeyeen, kuna bogaadiyeen hawlaha ay u hayso af Soomaaliga.

Dhanka kale, madaxda iyo hawlwadeennada AGA ee qurbaha ayaa qabtay kulan lagu xusay sannadguurada 13aad ee AGA, kaas oo uu hoggaaminayay Madaxa Yurub ee AGA, Md. C/raxmaan Abtidoon.

## Hambalyada Wasiirka Waxbarashada Soomaaliya ee 13guurada Aasaaska AGA



Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, Md. Faarax Sh. Cabdulqaadir, ayaa bogaadiyay 13guurada aasaaska Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA).

Wasiirka oo furayay xaflad lagu maamuusayay 13guurada AGA, ayaa hambalyo iyo bogaadin u diray Akademiyada, isaga oo ku ammaanay doorka ay ka qaadanayso daryeelka iyo horumarinta afka hooyo.

Wasiirku, wuxuu caddeeyay sida ay Dawladda Federaalka Soomaaliya uga go'an tahay taageeridda Akademiyada iyo hawlaha ay u hayso afka hooyo. "Waxaan u mahadcinayaa intii u soo halgantay hay'addan duruuf kasta oo la soo gudboonaatay, waxaan jecel ahay inaan hortiina ka ballanqaado inaanan ka hagran doonin Akademiya Goboleedka, wixii lala qaban karo iyo sidii kor loogu qaadi lahaa" ayuu yiri Wasiir Faarax Sh. C/qaadir.

## Hambalyo & Bogaadin 13guurada Aaasaakii AGA

Munaasabadda sannadguurada 13aad ee aasaaska AGA awgeed, waxaa hambalyo iyo bogaadin u soo diray masuuliyiin ay ka mid yihiin Wasiirka Waxbarashada, Md. Faarax Sh. Cabdulqaadir, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustafa Yaasiin, iyo Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta, Md. Ismaaciil Yuusuf.

Madaxdaas dhammaantood waxay AGA ugu hambalyeeyeen sannadguuradeeda 13aad, kuna bogaadiyeen hawlaha ay u hayso u adeegidda iyo hiillinta afka hooyo.

## Diyaarinta Ereybixinta Af Soomaaliga ee Amniga Saybarka




Waxaa si rasmi ah loo soo gabagabeeyay barnaamijka diyaarinta Ereybixinta Amniga Saybarka (Cybersecurity) ee Af Soomaaliga, kaas oo socday muddo toddobo toddobaad ah, laga bilaabo 1-da Juun ilaa 22-ka Luulyo 2026, ayna si wadajir ah uga shaqeeyeen Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), iyo Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, ayaa sheegay in ereybixintani ay xoojin doonto adeegsiga af Soomaaliga ee dhinaca amniga saybarka, isla markaana ay fududeyn doonto diyaarinta sharciyada, siyaasadaha iyo qoraallada cilmiyeed ee la xiriira arrintan.

Masuuliyiin iyo aqoonyahanno ka kala socday labada Akademiye iyo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa ka qaybqaatay diyaarinta ereybixintan, waxaana hawsha korjoogteynayay Prof. Cabdalla Cumar Mansuur.

## Xoojinta Iskaashiga AGA iyo Jaamacadda Ummadda



Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) iyo Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) ayaa yeeshay kulan lagu xoojinayay iskaashiga iyo wax wadaqabsiga labada hay'adood, kaas oo diiradda lagu saaray horumarinta afka Soomaaliga, aqoonfaafinta iyo arrimo la xiriira kobcinta dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed.

Kulanka oo ka dhacay xarunta Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), waxaa dhinaca Akademiyada uga qaybgalay Guddoomiyaha AGA, Macallin Saciid Saalax Axmed, iyo Prof. Cabdalla Cumar Mansuur. Dhanka Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed waxaa uga qaybgalay Guddoomiyaha Jaamacadda, Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed, Hormuudka Kulliyadda Afafka ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Dr. Maxamed Cali Cumar Shiidow.

Intii uu kulanku socday, waxaa looga hadlay qodobbo ay ka mid yihiin horumarinta af Soomaaliga, faafinta aqoonta, dhiirrigelinta hal-abuurka, iyo xoojinta tababarrada xirfadda qoraalka.

## Xarunta Hiddaha & Hal-abuurka oo AGA ku Maamuustay Astaanteeda

Maamulaha Xarunta Hiddaha iyo Hal-abuurka Naciima Axmed Xasan ayaa 27/6/2026 Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) guddoonsiisay hadiyad ka kooban astaanta AGA.

Hadiyadda waxaa AGA u guddoomay Prof. Cabdalla Mansuur. oo ka hadlay kaalinta mugga leh ee AGA ay ku leedahay ilaalinta iyo horumarinta afka Soomaaliga, isagoo tilmaamay in astaantanta la guddoonsiiyay aytahay mid lagu maamuusay munaasabadda 13-guurada AGA.

## Aqoonkororsi ah Miisaanka Maansada oo lagu Qabatay Xarunta AGA



Aqoonkororsi ay soo qabanqaabisay Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), cinwaankiisuna ahaa "Miisaanka Maansada iyo Xeerarka Tusmaynta Meeriska", ayaa 18 iyo 21 Maajo 2026 lagu qabtay xarunta AGA ee Muqdisho.

Aqoonkororsigan waxaa ka qaybgalay aqoonyahanno, xeeldheerayaal, abwaanno, qorayaal iyo arday jaamacadeed. Ujeeddadiisu waxay ahayd xoojinta fahamka miisaanka maansada Soomaaliyeed iyo xeerarka lagu hago dhismaha meeriska. Casharrada waxaa jeediyay Prof. Mustafa Fayruus, oo ah xeeldheere af Soomaaliga iyo suugaantiisa. Intii uu socday aqoonkororsigu, waxaa si qoto dheer loogu lafaguray xeerarka uu ku dhisan yahay miisaanka maansada Soomaaliyeed.

Prof. Cabdalla Cumar Mansuur, oo ka hadlay furitaanka aqoonkororsiga, wuxuu hoosta ka xarriiqay muhiimadda ay leedahay barashada xeerarka maansada Soomaaliyeed, wuxuuna ku tilmaamay mid ka mid ah mawduucyada xilligan u baahan in si cilmiyeed loo barto. Aqoonkororsigani wuxuu qayb ka yahay dadaallada Akademiya Goboleedku ku horumarinayo suugaanta Soomaaliyeed iyo kobcinta aqoonta

## Tababbar ah "Habdhigaalka Af Soomaaliga" oo loo Qabtay Madbacadaha




Tababbar ku saabsan "Habdhigaalka Af Soomaaliga", oo ay soo qabanqaabisay Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), ayaa 12 Luulyo 2026 lagu qabtay xarunta AGA ee Muqdisho.

Tababbarkan waxaa ka qaybgalay xubno ka kala socday madbacadaha Muqdisho, qorayaal, ardayda jaamacadaha iyo xubnaha naadiyada akhriska iyo qoraalka. Ujeeddada tababbarku waxay ahayd in kor loo qaado aqoonta iyo xirfadda habdhigaalka, isla markaana la xoojiyo mideynta habraacyada qoraalka af Soomaaliga.

Casharka tababbarka waxaa bixinayay Prof. Cabdalla Cumar Mansuur, oo ah xeeldheere af Soomaaliga, oo ka qaybgalayaasha si faahfaahsan ula wadaagay casharro ku saabsan "Habdhigaalka Af Soomaaliga". Wuxuu sharraxay xeerarka iyo habraacyada muhiimka u ah qoraalka saxda ah ee afka Soomaaliga.

Tababbarkani wuxuu qayb ka yahay qorshayaasha AGA ee tayaynta aqoonta qorayaasha iyo kobcinta adeegsiga habraac mideysan oo farta Soomaaliga ah. Sidoo kale; waa mid ka mid ah dadaallada AGA ku xoojinayso helitaanka habdhigaal mideysan.

## Kulanaqooneed AGA ku Qabatay Magaalada Kismaayo

Kulan aqooneed ku saabsan "Qiimaha Af Soomaaliga iyo Xaaladdiisa Maanta", oo uu jeedinayay Prof. Cabdalla Mansuur, ayaa 30/7/2026 lagu qabtay Kismaayo, Jubbaland. Kulanka waxaa soo qabanqaabiyay xubno ka kala tirsan Naadiga Ogaal, Madasha Tusmo iyo Midowga Naadiyada Akhriska, waxaana lagu falanqeeyay ilaalinta, horumarinta iyo cilmiyaynta Af Soomaaliga.

# Warar Qubane ah

### Aqoonkororsi ku Saabsan Hamsada (’) Af Soomaaliga

Akademiyada Goboleedka AGA ayaa 9/8/2026 xarunteeda Muqdisho ku qabatay aqoonkororsi ku saabsan Hamsada (') ee farta Soomaaliga. Aqoonkororsigan waxaa soo jeediyay Prof. Cabdalla Mansuur, waxaana ka faa’iidaystay xubno ka mid ah hawlwadeennada AGA, qorayaal, macallimiin, arday jaamacadeed iyo dhallinyaro xiiseeya akhriska iyo qoraalka Soomaaliga. Aqoonkororsigan ayaa qayb ka ah dadaallada lagu horumarinayo habdhigaalka Soomaaliga.

### Aqoonwadaag ku Saabsan Midaynta Habdhigaalka Tirada & Taariikhda

Akademiyada Goboleedka Af-Soomaaliga (AGA) ayaa 22/6/2026 xarunteeda Muqdisho ku qabatay aqoonwadaag ku saabsanaa mideynta habqoraalka tirada iyo taariikhda. Aqoonwadaagga waxaa gadhwadeen ka ahaa Prof. Cabdalla Mansuur. Guddoomiye-ku-xigeenka AGA, Md. Xuseen Wadaad, oo furay aqoonwadaagga, ayaa sheegay in uu qayb ka yahay dadaallada AGA ee lagu xoojinayo mideynta habdhigaalka Soomaaliga.

## Aqoonwadaag ku Saabsan Luqadda Tilmaanta

Akademiyada Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) ayaa 23/8/2026 xarunteeda ku qabatay aqoonwadaag ku saabsanaa Luqadda Tilmaamaha (Sign Language), kaas oo ay ka qaybgaleen bahda naafada, xeeldheerayaal iyo aqoonyahanno. Waxaa furay Guddoomiyaha AGA, Macallin Saciid Saalax Axmed, waxaana casharka bixiyay Md. Maxamed Xasan Shaaciye.

## Aqoonwadaag ku Saabsan Cilmiga Maktabadaha

Akademiyada Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) ayaa 10/8/2026 xarunteeda Muqdisho ku qabatay aqoonwadaag ku saabsanaa Cilmiga Maktabadaha, kaas oo uu soo jeediyay Md. Siidow Xaaji Maye, oo ku takhasusay Cilmiga Maktabadaha. Aqoonyahanku waxa uu ka hadlay taariikhda, horumarka iyo doorka maktabadaha ee kaydinta iyo faafinta aqoonta.

### Bandhig Sawir-gacmeedyo lagu Qabtay London

Laanta Akademiyada Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) ee dalka Ingiriiska iyo Golaha Qurbajoogta Soomaaliyeed (GQJS) ayaa 10–17 Juulaay 2026 magaalada London ku qabtay bandhig sawir-gacmeedyo ay sameeyeen dhallinyaro Soomaaliyeed. Bandhiggan oo ahaa sannadkii labaad ee la qabto ayaa lagu dhiirrigelinayay hal-abuurka iyo hibada dhallinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan dhinacyada farshaxanka iyo muujinta dhaqanka Soomaaliyeed.

# WARAR KALE OO XUSID MUDAN

## Gorfaynta Buugga "Habdhigaalka Af Soomaaliga Guud"

Xarunta Maktabadda Dhaxalreeb ayaa 10 Juun 2026 lagu qabtay kulan aqooneed oo lagu falanqeeyay buugga "Habdhigaalka Af Soomaaliga Guud (Midayn, Horumarin iyo Casriyayn)", oo uu qoray aqoonyahan Prof. Cabdalla Cumar Mansuur.

Buugga waxaa si cilmiyeed u lafaguray aqoonyahannada kala ah Axmed Cabdi Maxamed, Maxamed Axmed Dirir, Mustafa Fayruus iyo Cabdallaqaadir Jubba, kuwaas oo soo bandhigay aragtiyo iyo falanqayn ku saabsan nuxurka buugga, muhiimaddiisa iyo kaalinta uu ka qaadan karo horumarinta, midaynta iyo casriyeynta habdhigaalka af Soomaaliga.

Munaasabadda waxaa ka soo qayb galay aqoonyahanno, qorayaal, bahda waxbarashada, cilmibaadhayaal iyo marti sharaf kale oo danaynaya horumarinta af Soomaaliga. Kulanka ayaa diiradda lagu saaray qiimaha buugga iyo kaalinta uu ka qaadan karo kobcinta cilmi-afeedka Soomaaliga. Qoraaga buugga, Prof. Cabdalla Cumar Mansuur, ayaa ka hadlay ujeeddooyinka uu

## Gorfaynta Buugga "Seeska Naxwaha Af Soomaaliga"

Maktabadda Dhaxalreeb ayaa 23 Juun 2026 lagu qabtay kulan aqooneed oo lagu gorfaynayay buugga "Seeska Naxwaha af Soomaaliga", oo ay qoreen Prof. Cabdalla Cumar Mansuur iyo Md. Idiris Maxamed Cali.

Kulankan ayaa ujeeddadiisu ahayd in si cilmiyeed loo falanqeeyo buugga iyo kaalinta uu ku leeyahay daraasaadka naxwaha af Soomaaliga. Buuggu wuxuu ka mid yahay qoraallada muhiimka u ah barashada iyo fahamka qaab-dhismeedka af Soomaaliga, isaga oo diiradda saaraya aasaaska naxwaha, xeerarka luqadda iyo hababka lagu kobcin karo aqoonta afka hooyo.

Buugga waxaa si cilmiyeed u gorfeeyay aqoonyahannada kala ah Barafasoor Maxamed Cilmi Tooxoow, Maxamed Maxamuud Guuleed (Daqarre) iyo Cabdiwali Maxamed Shiikh Cumar, kuwaas oo soo bandhigay aragtiyahooda iyo falanqayntooda ku saabsan nuxurka buugga. Waxay dul istaageen muhiimadda iyo doorka uu buuggu ku leeyahay midaynta, horumarinta iyo casriyeynta af Soomaaliga.

## Gorfaynta Buugga Taariikhda Afka iyo Bulshada Soomaaliyeed oo lagu qabtay Xarunta Dhaxalreeb

Xarunta Dhaxalreeb ayaa 7 Luulyo 2026 qabatay kulankeedii saddexaad ee gorfaynta buugaagta, kaas oo lagu falanqeeyay buugga "Taariikhda Afka iyo Bulshada Soomaaliyeed: Daraasaad Af iyo Dhaqan", oo uu qoray Barfasoor Cabdalla Cumar Mansuur.

Kulankan aqooneedkaas ayaa lagu iftiimiyay muhiimadda uu buuggu u leeyahay daraasaadka af Soomaaliga, dhaqanka iyo taariikhda bulshada Soomaaliyeed. Buuggu wuxuu si cilmiyeed u eegayaa xidhiidhka ka dhexeeya afka iyo bulshada, isaga oo sharaxaya kaalinta afku ku leeyahay kaydinta hiddaha iyo fahamka hab-dhismeedka bulshada Soomaaliyeed.

Intii uu socday kulanka qoraa C/qaadir Diini, oo soo akhriyay buugga iyo aqoonyahanno kale ayaa falanqeeyay nuxurka buugga, iyaga oo ka hadlay horumarka af Soomaaliga, lahjadaha, suugaanta, dhaqanka iyo abtirsiinta.

Barfasoor Cabdalla Cumar Mansuur ayaa sidoo kale ka hadlay ujeeddada qoraalka iyo daraasaadka salka u ah buugga, isaga oo xusay sida afka iyo dhaqanku uga qayb qaataan ilaalinta taariikhda iyo aqoonsiga bulshada Soomaaliyeed.

## Guddoomiyaha AGA oo la Kulmay Madaxda NASLI ee Waqooyiga Amerika



Guddoomiyaha Akademiya Goboleedka Macallin Saciid Saalax ayaa 14/7/2026 waxa uu magaalada Minnesota ee dalka Maraykanka uu kulan kula yeeshay xubnaha "North American Somali Language Institute"(NASLI).

Macallin Saciid Saalax ayaa mas'uuliyiinta & xubnaha NASLI ka wadahadlay sidii ay u wada shaqayn lahaayeen AGA & NASLI, iyadoo lagu ballamay xoojinta xiriirka iyo wada shaqaynta labada dhinac.

Ururka NASLI ayaa lagu wadaa 11 Sebtembar 2026, inuu qabto xaflad lagu xusayo maalinta caalamiga ah ee akhris qoraalka adduunka.

Kulankani ay isugu yimaadeen labada dhinac ayaa noqonaya fadhigii 4aad oo ay yeeshaan AGA &

Af Soomaaligu waa Astaanta jiritaanka ummadda Soomaalyeed

## Munaasabad lagu Maamuusay Qoraa Cali Muuse Ciye oo lagu Qabtay Minnesota



Munaasabad ballaadhan oo lagu maamuusay soo dhaweynta qoraaga buugga Xeer Ciise, Md. Cali Muuse Ciye, ayaa 26-ka Juun 2026 lagu qabtay magaalada Minnesota ee dalka Maraykanka.

Munaasabadda waxaa ka soo qayb galay masuuliyiin, aqoonyahanno, qorayaal iyo marti sharaf kale.

Cali Muuse Ciye waa qoraa iyo aqoonyahan reer Jabuuti ah, kaas oo wax ka qoray daraasaadka Xeer Ciise iyo dhaqanka Soomaaliyeed. Waxaa kale oo uu leeyahay waayo-aragnimo shaqo oo caalami ah, isaga oo ka soo shaqeeyay hay'adda UNESCO.

Guddoomiyaha AGA, Macallin Saciid Saalax, ayaa ka hadlay aqoonta uu u leeyahay qoraaga Cali Muuse Ciye iyo hawlihii uu ka soo qabtay UNESCO.

Wuxuu tilmaamay in Xeerkan yahay xeer Soomaali ah, balse uu gaaray heer caalami oo lagu aqoonsaday muhiimaddiisa iyo qiimihiisa. Ugu dambayntii, Cali Muuse Ciye ayaa uga mahadnaqay soo dhaweynta wanaagsan ee loogu sameeyay dalka Maraykanka.

## Deeq Buugaag ah oo Talyaaniga ugu Deeqay Maktabadda AGA

Maktabadda Akademiyada Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) ayaa 20/7/2026, waxay heshay deeq buugaag ka hadlaya maansada haweenka Soomaaliyeed, kuwaas oo ay qortay Ruixuan Li, waxaana ku deeqday dowladda Talyaaniga. Soo gaarsiinta deeqdan waxaa ka shaqaysay Prof. Annarita Puglielli.

# Warar Qubane ah

.

## Naadiga Qalin Qoyan oo Qabtay Muxaadaro ku Saabsan Maareynta Dhaqaalaha

Naadiga Qalin Qoyan ayaa 22 Juulaay 2026 xarunta AGA ku qabtay muxaadaro ku saabsan Aqoonta Maaliyadda iyo Maareynta Dhaqaalaha, taas oo uu soo jeediyay Dr. Xamse Xabiib. Muxaadarada ayaa diiradda lagu saaray muhiimadda fahamka maamulka lacagta iyo kala saarista baahida iyo rabitaanka. Dr. Xamze ayaa sheegay in lacagtu aysan qofka beddelin, balse ay muujiso dabeecaddiisa dhabta ah. Guddoomiyaha Naadiga Qalin Qoyan, Ismaaciil Cabdullaahi, ayaa uga mahadceliyay

## Munaasabadda Sannadka Dabshidka Soomaalida oo Muqdisho lagu Qabtay

Xarunta Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta ayaa 16 Luulyo  2026 lagu qabtay munaasabadda Sannadka Dabshidka Soomaalida, oo sannadkan ah Sannad Khamiisaad, waxaana iska kaashaday Xarunta Dhaqanka iyo Cilmibaarista Xaanshow iyo Akademiyada Cilmiga. Munaasabadda ayaa sidoo kale lagu soo bandhigay qaar ka mid ah ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

## Bandhigga Buugaagta Hargeysa 2026

Waxaa magaalada Hargeysa lagu qabtay Bandhigga Buugaagta Hargeysa 2026, kaas oo socday 25–30 Luulyo 2026. Bandhigga ayaa lagu soo bandhigay buugaag cusub oo ay qoreen qoraayaal Soomaaliyeed iyo kuwo kale, waxaana sidoo kale lagu qabtay kulammo aqooneed, dooddo suugaaneed iyo barnaamijyo lagu dhiirrigelinayo doorka buugga iyo akhriska ee horumarinta bulshada.

## Daahfurka Buugga “Hoggaamiyayaashii Soomaaliya 1956–2026”

Munaasabad lagu daahfurayay buugga “Hoggaamiyayaashii Soomaaliya 1956–2026” ee uu qoray Axmed Maxamuud Dhicisoow ayaa 5 Maajo 2026 lagu qabtay magaalada Muqdisho. Mas’uuliyiin ka kala socday Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), Ururka Saxafiyiinta FESOJ, bahda jaamacadaha iyo aqoonyahanno kale ayaa si weyn u ammaanay buugga iyo dadaalka qoraaga.

## Furitaanka Hoyga Dhaqanka Soomaalida London

Jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka Ingiriiska ayaa 17 Maajo 2026 magaalada London ka furtay hoy cusub oo loogu talaggalay soo bandhigista dhaqanka, farshaxanka iyo taariikhda ummadda Soomaaliyeed. Hoyga Dhaqanka ayaa loo aasaasay inuu noqdo goob lagu keydiyo laguna soo bandhigo dhaqanka, taariikhda iyo farshaxanka Soomaaliyeed, isla markaana lagu xoojinayo xiriirka jiilasha cusub ay la leeyihiin hiddahooda.

## Ardayda Jaamacadda Green Hope iyo Russet Academyoo soo Booqday Xarunta AGA

Arday ka socotay Kulliyadda Af Soomaaliga iyo Suugaanta ee Jaamacadda Green Hope ayaa 25/07/2026 booqasho aqoonkororsi ah ku yimid xarunta Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) ee magaalada Muqdisho. Sidoo kale, ardayda Russet Academy ayaa 20/05/2026 soo booqday xarunta AGA. Booqashooyinkani waxay kaalin muhiim ah ka qaataan kobcinta aqoonta iyo waayo-aragnimada ardayda.

## KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO

# Maahmaah

. Soomaalidu waa bulsho suugaaneed oo ay hadalkeeda ceegaagto murti mug iyo miisaan weyn leh. Qaybaha suugaanta ee afkeennu hodanka ku yahay waxaa ka mid ah maahmaahda, oo bahda tiraabta lagu tiriyo.

Maahmaahdu waa hadal kooban oo badanaa xarafraac ku socota, oo dad meel deggani isla wada yaqaanniin, isla markaana xanbaarsan fikrad run ah oo ay bulshadu isku raacsan tahay.
Maahmaahdu waxay ku baxdaa dhacdo, waxaana maahmaahda marka la soo qaadanayo lala xidhiidhiyaa dhacdo hore oo la mid ah dhacdada markaa taagan, si hadalka loogu adkeeyo oo maanka dhegeystahana loo hanto.

Sidaas darteed, maahmaahdu waxay dadka ka caawisaa inay wax ka bartaan dhacdooyinkii hore, hadalka ku qurxiyaan, aftahannimadooda ku kobciyaan, doodda iyo baanahana ku xoojiyaan.

Qaybo door ah bay maahmaaahdu leedahay oo ay ka mid yihiin. Mid hal dhud ah iyo kuwo dhowr dhudood leh oo ay saddexleydu ugu caansan tahay.
Maahmaahda halka dhud ah, waxaa ka mid ah:

*“Af jooga looma adeego”*
*“Aqoon la’aani waa iftiin la’aan”*
*“Gacmo wadajir bay wax ku gooyaan”*
Aan tusaale ka soo qaadanno maahmaahda saddexlayda ah ee tiraahda:
*“Saddex baa dad ugu liita: ma toshe, ma tashiishe iyo ma tashade”*
Badiba maahmaahda lama xusuusto qofkii hal-abuuray, waxaase jira kuwo dhif ah, oo weli la sii xusuusto qofkii bixiyay. Waxaa tusaale u ah maahmaahda:
*“Dani waa seeto”*

**Erayga Tirsiga**

**Hufnaan**

Macne: Wax si hagaagsan loo qabto ama loo soo bandhigo.
Hufnaan (-ta) -wax hufan ahaan;jafnaan; nadiifsanaan.
Hufan *f.mg*[4] (-fnaa, fnayd) 1. Wax la sifeeyay ama boorka laga qaaday ahaansho. 2. Wax la kala saaray ahaansho. 3. Qof aan ceeb lahayn ahaansho.

Tusaale:
Hufnaanta shaqadu waxay horseeddaa natiijo wanaagsan.

Ereyo la macne dhow: hagaagsanaan, wanaag, nidaamsanaan.

**Waxaa isku dubbariday**
**Qoraa Dayax Axmed-Iley**

Hormarinta afku waa horumarinta ummadda

## SUUGAANTA & HAL-ABUURKA

### Nin Garbood (Sheeko Gaaban)
### Qalinkii Mooge Umal

Dad fara badan ayaa ku soo jabay. Raxan bay u wada socdaan oo qawdhamayaan. Qaar ayay qayladoodu ka soo horraysaa, inta ayna makhaa-yadda soo gaadhin ayay halkaa ka soo buuqayaan, qaarna iyaga oo luudaya ayay soo jiitamayaan. Darba waa jaad. Kuwo ayaa dhibaataysan oo daalku dilooday, shaqada ayay ku noogeen oo kuraasta ayay ku qolofoobeen. Waxa ku jira rag aamusan oo ax gabay, wax ay xiisa u hayaanna jirin. Waxa kale oo soo raaca, kuwa degdegaya oo fadalka qaadaya. Firfircooni baa foolkooda ka dhalaalaysa. Makhaayadda way u darsadeen, wayna ka muuqataa inay maanta oo dhan sugayeen. Shalay galab oo dhan ayay fadhiyeen, fiidkii ayay goor danbe ka rawaxeen, hadda ayaa markaa u xigta, murankii,
sheekadii qabiillada, iyo fadhikudirirkii goobta ay u jeeleen. Kolka ay shaqooyinka ka soo baxaan ayay makhaayadda dhankeeda u soo dareereen, si ba'naan leh ayayna ugu soo qamaamaan, sidii xo-olo cusbo loo dhigay.

Laba nin ayaa imminka soo galay, waa rag dhaadheer oo dhuudhuuban.
Waxa la moodaa in ay is lulayaan, si degdeg leh ayayna u dhaqaaqayaan, waxaana ka shagax leh furayaal ay gacmaha ku sitaan. Iyaga oo sheeko xiisa leh wata ayay soo gaadheen. Dareen togan ayay ka helaan inay goobtan yimaaddaan, waxayna ku soo bandhigaan kartidooda faaqidaadda. Tamar badan bay u hayeen faallada qabiilka iyo siyaasadda. Waxay ugu baxday faal-lada reer Qaanjeer oo dhawaan is hubeeyay, waxayna ku dheeraadeen in aysan reer Qaanjeer u dhigmin jifadooda, waayo reer Qaanjeer ma aha dad dhib jecel, waxbarashada iyo shaqada ayay xoogga saaraan. Afaafka hore ayay fadhiisteen, waa meel bacad ah, xoogay ayay debedda ka xigaan jiingadda la hadhsado ee makhaayadda. Fallaadhaha cadceedda ayaana toos ugu aadda-naa.

Labada nin kan caatada ah ayaa gadaal soo jal-leecay, kadib inta uu kii kale si hiyikac leh u fiiri-yay ayuu qosol xanaf leh gaaddada ka hinqaday.

"Alla.. Waa dad talada laga habaaray.."

"Had iyo goor waxbarasho iyo cunto uun bay ka fekeraan, sida asaagood bal may tashadaan.."

Jiibta ayay isla heleen. Jeer kale ayay si cusub saluug uga muujiyeen guurtida reer Qaanjeer.

"Waxaan maqlay kan garaadka u ah waa aqoonyahan, shahaadooyin sita."

Kii kale ayaa si adag ugu raacay..

"Ma shahaadaa rag kala wadaysa.."

"Wallee shaahaadaan wax u tarin…"

Si xiisa leh ayay hadalka isugu halceliyaan, xallad dheeri ah ayay middaa ka bogteen. Isaga oo hadalkii u danbeeyay sii mashiiqsa-naya ayuu midkood dalabka dhiibtay.

Mudalabka ayuu u holloday, kolkaa ayuu sheedda ka arkay gole feerarsan oo foolaadka reerkooda u meegaarsan. Halkii ayay dhakhso uga kaceen.

Adeerkii ayay goobta ku ballameen, barqa dheer ayuuna yimi. Odaygu wuu ku raagay, waxa uu ku wareeray fadhikudirirka iyo yooyootanka tan iyo saaka meesha ka socday. Makhaayaddu waa goob bulsho ba-dan isugu timaaddo, waana meel u samcan doodaha madhalayska ah, waxaase loo eexaystaa shaaha barraadka ah iyo xogaha filiqsan ee lagu wadaago. Si gaar ah waa makhaayad tolku u badan yahay oo lagu ya-qaanno, odayguna waxa uu Hayaan meesha ugu ballamiyay inuu tolka sii dhex joogo. Hayeeshee Hayaan taasi uma muuqan. Goobtu inay meherad ganacsi tahay wax ka duwan uma uusan arkayn.

Hayaan wuu diyaarsanaa, dedaal ayaana ka go'naa, rejeduna way u horaysay, waayo adeerkaa ayuu ugu laabqaboojiyay inay wax hagaagayaan, berri iyo makhaayadda Qawd-hama. Waxa uu watay nuqullo ay shahaa-dooyinkiisa ku jireen. Adeerkii ayaa sidaa faray, isaguna wuu soo qaaday.

*Fiiri bogga 15 aad*

# **Nin Garbood (**Sheeko Gaaban)
## Qalinkii Mooge Umal

*Ka yimid bogga 14 aad*

In uu shaqo geynayo uma uusan sheegin, wax-ase uu tibaaxay in uu u geynayo nin si wacan wax ula qaban doona. Iyaga ayuuna maanta oo dhan bartan ku sugayay.

Goor dhawayd ayaa makhaayadda la soo buuxiyay. Xagga hore ayuu fadhiyay, cid ay is aqoonsadaanna intaa meesha kuma arag, mana garan in jifadoodu makhaayaddan u badan tahay, ama lagu xanto inay fadhikudirirkooda tahay. Xagga hore ee waddada xigta ayuu intii hore fadhiyay, laydh macaan ayay lahayd. Had-dase dhanka gudaha xigta ayuu u soo gudbay, laydhii ma jirto.

Dadkan badan ee imminka yimina, buuq iyo kulayl ayay soo kordhiyeen. Goobta oo sidii hore ka geddisan, waxay xiiso la yeelatay inuu fiirada badiyo, meesha iyo dadkaba si wacan u dhugto. Agtiisa ayuu ka arkay golayaal teer iyo barqadheertii gorodda la iskula jiray, si gaar ah waxa u dhugtay nimankii buurbuurnaa ee tan iyo saaka gabranaa.

Nin iyaga ka wada cayilan oo dub adag ayaa ku soo biiray. Geesta kale laba dhalinyaro ah ayaa ka soo kacay, xaggooda ayayna soo aadeen. Fadhigii meegaarsanaa ayay dardar ugu sii biireen, iyaga oo aan fadhiisan ayay kaftan sokeeyanimo leh ku jalbeebeen, si weyn ayaa loo soo dhaweeyay. Halkii ayayna sheekada ka ambaqaadeen.

Sidoo kale waxa uu garabka ku haya gole habacsan oo ay fadhiyaan rag kale oo daallan, shaaha baraadka ayay si nuxuus ah fiiqsiga ugaga shanqarinayaan.

Dhabarka ayay dhiica ku wada leeyihiin, aamuska ayayna eegmada isugu wehel yeelayaan, waana cidda keli ah ee ugu jabaqda yar goobta. Aragoodu waa farsamayaqaanno ku rafaaday shaqada adag. Gacma qallafsan oo waaweyn ayay koobab dhal ah ku duuban yihi-in, si kahasho leh ayay hareeraha u dhuga-nayaan.

Diif iyo diihaal baa oogadooda saaran, hayeeshee habacsanaantoodu daleel ma aha, waa rag ka roon qoladan agtooda gabran. Sheekadoodu waxay ku saabsan tahay suuqa, waayaha taagan iyo xaaladda ubadkooda. Makhaayaddu waxay u tahay goob nasasho, shaah barraad ah oo diirran-na ka fiiqsadaan. Meel ay ku kala war qaa-taan, dabadeed shaqada ama aqallada uga sii dheelmadaan.

Waxaa dhinaca ku haya fadhi ka duwan. Way murmayaan, way baanayaan, labo ayaa marba is jigraaraya, ama jiibta isla helaya. Waa gole la isku soo bandhigo, ama xog iyo faallo kale oo jaan lagu wadaago, waxaana xusid mudan inuu ya-hay gole horraantaba dhisan, leh geedfadhi xeeldheere ah, kuwaas oo leh door loo majeerto. Fadhikudirirka waxa ka arrimiya rag aan hawl ka muuqan oo balbalaxsan. Waa wada xarragatoor, waa wada qalan-baawi, waxa haybad iyo golejoog ka muuqda waa yaab. Sidaas oo ay tahay waa rag badhaq nugul, kartidu way xanuujisaa, dan la'aantuna waxay u tahay ayaakatalin-ta reerkooda.

*La soco qabyta 2aad*

Akhrisku waa furaha aqoonta





Guddoomiyaha Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga AGA, Macallin Saciid Saalax Axmed oo xafiiskiisa ku soo dhoweeyay guddoomiyaha Jaamaacadda Ummadda Soomaaliyeed Dr. Maxamed Maxamud Maxamed

# Guddoomiye Kuxigeenkii AGA oo Alle Oofsaday!



Allaha u naxariistee, waxaa dalka Hindiya ku geeriyootay guddoomiye kuxigeenkii Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga (AGA), Dr. Cabdinaasir Axmed Ibraahim.

Geerida guddoomiye kuxigeenka AGA, waxaa ka tacsiyeeyay Madaxweynaha Dawlad Deegaanka Soomaalida Md. Mustaf Cumar Cagjar, Wasiirka Waxbarshada Soomaaliya Md. Faarax Shiikh C/qaadir,

Sidoo kale, waxaa ka tacsiyeeyay geerida Dr. Cabdinaasir guddoomiyaha Akademiya Goboleedka Macallin Saciid Saalax Axmed, guddoomiye kuxigeennada AGA Dr. Xuseen Maxamed Cabdulle (Wadaad) & Ismaaciil Cabdi Axmed, dhammaan xubnaha guddiga fulinta ee Akademiyada, madaxda waaxyaha, hawlwadeennada xarunta dhexe, mas'uuliyiinta rugaha & laamaha Akademiyada gudaha & dibadda, kuwaasi oo dhammaantood Dr. Cabdinaasir Alle uga baryay inuu Jannada ka waraabiyo, qoyskii uu ka baxayna inuu samir iyo iimaan ka siiyo.

Dr. Cabdinaasir oo muddo dheer ka mid ahaa guddoonka Akademiyada ayaa dhashay sannadkii 1962, wuxuuna inta badan ee noloshiisa uu galiyay dhinacyada waxbarashada , afka, dhaqanka & horumarinta bulshada, isagoo soo noqday & Madaxweynihii 1aad jaamacadda Jigjiga.